# Macaashka Ilmaha

Miiska ku jira


| | |
|---|---|
| Yaa la siiyaa macaashka caruurta? | 1 |
| Maxaad u baahan tahay marka aad codsaneyso macaashka ilmaha | 2 |
| Macaashku waxa uu u soconayaa ilaa da'da 18 | 2 |
| Haddii aad korineyso ilmo yar | 2 |
| Imisa ayaa la siinayaa qoyska? | 2 |
| La Xiriirka Lambarka Bulshada | 3 |


Sanadkii 2016kii, waxaanu qeybinay celcelis ahaan lacag gaareysa $2.6 milyan bil kasta oo loo qeybiyey caruur gaareysa 4.3 milyan waayo mid ama labadooda waalid ayaa naafo ah, hawlgab noqday a,a geeriyooday. Lacagtaas waxa ay ka caawisaa in ay helaan waxyaabaha lama huraanka u ah noloshooda taasoo ka caawineysa in ay dhameystirtaan waxbarashada dugsiga sare. Marka waalidku naafo noqdo ama geeriyoodo, macaashka Lambarka Bulshada waxa uu qoyska ka caawiyaa dhaqaale wax ka taray mustaqbalka qoyska.

***FIIRO GAAR AH:*** *Caruurta naafada ah oo dakhliga waaalidkood kooban yahay ama aan laheyn meel kale oo wax ka soo galaan waxa ay xaq u yeelan karaan Macaashka Kabitanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada. Akhri Daabacaadda,* Benefits for Children With Disabilities *(Publication No. 05-10026).*

## Yaa la siiyaa macaashka caruurta?

Ilmahaaga aan guursan macaashka xaq ayuu uyeelanayaa haddii ay:

- Ka yar yihiin 18;
- Da'diisu tahay 18-19 sano yahayna arday (aan weli dhaafin fasalka 12aad); ama
- Da'diisu tahay 18 ama ka weyn oo naafo noqday intuusan gaarin da'da 22.

xaalado gaar ah qaarkood, macaashka waxaa la siinayaa ilmaha xaaskaagu dhashay, aad awoowaha u tahay, ilmaha xaasku dhashay ay dhaleen, ama ilmo aad korsatay.

Si aad macaash u hesho, waa in ilmahaagu:

- Waalidka oo naafo ah ama hawlgab ah oo xaq u leh macaashka lambarka bulshada; ama
- Waalidka oo geeriyooday ka dib markii ay ka shaqeynayeen muddo dheer shaqo laga jarayey canshuurta Lambarka Bulshada.

## Maxaad u baahan tahay marka aad codsaneyso macaashka ilmaha

Marka aad u codsaneyso caruurtaada macaashka, waxaa lagaa doonayaa taariikhda dhalashada caruurta, tan waalidka iyo Lambarkooda Bulshada. Iyada oo ku xiran nooca macaashka ee aad u codsaneyso, waxaa laga yaabaa in aqoonsiyo kale lagaaga baahdo. Tusaale ahaan, haddii aad caruurta u codsaneyso macaashka dhaxalka, waxa lagaa doonayaa in aad keento caddeynta geerida waaalidka. Haddii aad codsaneyso macaashka ilmo naafio ah, waa in aad keentaa caddeyn muujineysa naafanimada ilmaha. Wakiilada Lambarka Bulshada ee aad la kulanto ayaa ku sheegaya qoraalada kale ee lagaaga baahan yahay.

## Macaashku waxa uu u soconayaa ilaa da'da 18

Macaashku wuu istaagayaa marka ilmuhu gaaro 18 jir haddii aanu ilmahaagu aheyn arday ama naafo.

### Haddii ilmuhu arday.

Sadex bilood ka hor ka hor inta aanu ilmuhu gaarin 18, waxaa lagu soo ogeysiinayaa in macaashku go'ayo marka ilmahaagu gaaro 18. Macaashku ma istaago haddii ilmaahagu yahay arday dhigta dugsi sare (ama dhexe). Haddii ilmahaagu ka yar yahay 19 oo weli uu dhigto dugsi sare ama dhexe, waa in ay na soo wargeliyaan. Waa in ay buuxiyaan foomka tegitaanka dugsiga oo maamulka dugsigu saxiixo. Inta badan macaashku wuu sii soconayaa ilaa ilmuhu qalin jabiyo, ama laba bilood ka dib marka ilmuhu gaaro 19 jir hadba kan soo horeeya.

### Haddii ilmuhu naafo yahay

Macaashku wuu u soconayaa ilmaha naafada ah ilaa da'da 18. Macaashka ilmaha naafada ku noqda yaraanta sidoo kale wey sii soconeysaa ilaa uu ka gaaro 18, haddii ay nafaanimadu bilaabatay ka hor inta aanu ilmuhu gaarin 22.

## Haddii aad korineyso ilmo yar

Haddii aad macaash ku qaadato caruur aad xanaaneyso darteed, taariikhda uu macaashkaagu istaagayo way ka duwanaan kartaa tan ilmaha.

Haddii aanu ilmuhu naafo aheyn, macaashkaagu waxa auu istaagayaa marka ilmuhu gaaro 16 jir.

Haddii ilmuhu naafo yahay, macaashka wuu kuu sii soconayaa haddii aad ilmaha gacanta ku heyso oo aad korineyso ilmo madaxa ka jiran. Macaashku waxa kale oo kuugu sii socon karaa haddii aad adeeg u fidiso ilmo jir ahaan naafo ah. Inta aanu ilmuhu gaarin 16 jir, waxaanu kuu soo direynaa ogeysiis lagugu faahfaahinayo sida uu macaashku kuugu sii socon karo.

## Imisa ayaa la siinayaa qoyska?

Marka la eego qoyska, ilmaha waxaa la siin karaa ilaa kala badh lacagtii macaashaka hawlgabka ee waalidku qaadan jiray ama naafo ah. Haddii ilmuhu qaato macaashka dhaxalka, waxaa la siin karaa ilaa 75 boqolkiiba macaashka Lambarka Bulshada ee uu qaadan lahaa waalidka geeriyooday. Hase yeeshee, waxaa jira xad aanay dhaafi karin lacagta qoyskaaga la siinayo. Macaashka ugu badan ee qoysku qaadan karo waxaa ay ku xiran tahay qeyb ahaan sida loo xisaabo nooca macaashka Lambarka Bulshada. Waxa ay noqon kartaa inta u dhaxeysa 150 ilaa 180 macaashka guud ee waalidka. Haddii lacagta dhamaan qoysku qaadanayo ay ka badan tahay xadka, waxaa la yareynayaa macaashka uu qof kasta qaato si siman (marka laga reebo tan waalidka) ilaa wadarta guud ay noqoto tirada ugu badan ee la ogol yahay.



*(rogad)*

## La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

### Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriiro kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda ***www.socialsecurity.gov***. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my* Social Security xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement* (*Warbixinta Lambarka Bulshada*), ka hubiso lacagta aad shaqeysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada laguu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

### Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.

Securing today
and tomorrow

**Social Security Administration**
Publication No. 05-10085-SO | July 2017
Macaashka Ilmaha
Benefits for Children (Somali)
Produced and published at U.S. taxpayer expense
Waxaa lagu soo saaray oo lagu daabacay lacagta canshuur bixiyayaasha